



## Nina uma banaana inuu gooyo walaalkii saddex habeen wax ka badan, iyagoo kulmaya oo midba midka kale ka jeensanayo, labadoodana waxaa khayr badan kii bilaaba salaanta

Abii ayuub Alansarii Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka scw ayaa yiri: "Nina uma banaana inuu gooyo walaalkii saddex habeen wax ka badan, iyagoo kulmaya oo midba midka kale ka jeensanayo, labadoodana waxaa khayr badan kii bilaaba salaanta."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu reebay in qofka muslimka ah gooyo walaalkiisa muslimka ah wax ka badan saddex habeen, iyagoo wada kulmaya oo aan isasa salaamayn oo wada hadlayn. Waxaana fadli badan labada isu caraysan kii isku daya inuu gooynta joojiyo oo salaanta bilaaba, gooynta la sheegay waxaa loo jeedaa wax qofka dantiisa ah, laakiin gooynta ku saabsan xaq Ilaahay leeyahay, sida in la gooyo kuwa caasiyada ah, kuwa bidcada ah iyo saaxiibada xun, taasi waqti kuma xirna ee waxay ku xiran tahay danta loo gooyey, oo hadii ay joogsato iyana way joogsan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5365>

